



CBS

BANGIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

البنك المركزي الصومالي

CENTRAL BANK OF SOMALIA

WAR-SAXAAFADDEED:

Bankiga Dhexe ee Soomaaliya wuxuu maanta ruqsadda Mobile Money (License) guddoonsiiyey shirkadda Hormuud Telecom. Waa markii ugu horeysay oo Bangiga Dhexe bixiyo ruqsad noocaan ah.

Adeeggan waxaa isticmaala in ka badan 70% shacabka Soomaaliyeed. Lacagta dhexmarta adeegga Mobile Money bil kasta waxa lagu qiyaasay \$2.7 bilyan, sida ay qortay warbixinta Bangiga Aduunku ee sanadkii 2018.

Bixinta Ruqsadda adeega lacaguhu waxay muhiimad gaar ah u leedahay sharciyaynta shirkadaha bixiya adeegan, xasilinta hab-maaliyadeedka waddanka iyo ilaalinta hantida macaamiisha iyo tan shirkadaha gaarka loo leeyahayba.

Munaasabadda lagu bixinayey Ruqsadda waxaa goobjoog ka ahaa Wasiirka Maaliyadda, Wasiirka Qorshaynta, Maalgelinta iyo Horumorinta Dhaqaalaha iyo Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Tignoolajiyada Dowladda Federaalka, Agaasimaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Agaasimaha Hay'adda Warbixinta Maaliyadda, Guddoonka Ururka Bankiyada iyo Xoghaya ururka Xawaaladaha.

---Dhammaad---